# Saxaafadda iyo Maareynta Shaqaaqooyinka

Sida aad ka warqabtaan, waxaa maanta caalamka ku soo kordhay maado cusub ee la magac baxday xallinta khilaafaadka ama maareynta shaqaaqoyinka qofba siduu u yaqaan. Waxaa madaadan duruus ahaan looga qaataa goobaha waxbarashada oo waxay ka mid yihiin manaahijta waxbarasho heerarka kala duwan.

## Fahamka shaqaaqooyinka. (Is diid gacan ka hadal wata).

Weriyeyaasha Mehnadleyda ah (Professional reporters), ama ha ogaadeen ama yaaneyba ogaanine waxay yihiin khubarada shaqaqooyinka. Marka lagu fiiriyo il Weriyenimo isbedelku waa war. Marka uu isbedel dhaco, waxaa markiiba yimaado heshiis darro ama shaqaaqo, isdiid, ismaandhaaf oo marka dambe u xuub siiban kara dirir. Diriirtu waxay dhex martaa kuwa isbedel doonka iyo kuwa ka soo horjeeda, amase kuwa doona isbedel ka sii ballaaran midka dhacay iyo kuwa isbedel diidka ah.

Sidaa darteed, Weriyayaashu waxay sida badan faraha kula jiraan isdiid ama shaqaaqo inta ay hawshooda gudanayaan oo ay ku guda jiraan. Iyadoo ay sidaas tahay ayaa saxafiyiin badan aaney wax badan ka ogeyn fekerka shaqaaqada. Ma oga jiridda waxaa dhaliyay shaqaaqada amaseba sida ay ku dhammaneyso mana oga noocyada kala duwan ee shaqaaqada.

In ka badan 50 sano ayaa Diblomaasiyiin, dadka wax dhexdhexadiya iyo culimada arrimaha Bulshada waxay darsayeen shaqaaqada waxayna soo saareen fahamka (sophisticate) sida daawada, ganacsiga iyo muusikadaba. Laakiinse, tiro oo Wariyeyaal ah ayaa tababar ku qaatay nadariyadda shaqaaqada.

Saxafiyiinta badankooda si sahal ayay shaqaaqada u soo weriyaan oo siday u dhacday oo keli ah. Marka la garab dhigo Weriyayaasha ka soo warrama arrimaha caafimaadka iyo daawada ma soo tebiyaan oo keli ah xanuunka qofku la il daran oo keli ah, balse waxay soo tebiyaan waxa dhaliyay xanuunka iyo sida loo daweyn karo.

Weriyayaasha wararka ayaa waxay kari karaan inay helaan tab kaa la mid ah marka ay timaado warinta ama wartebinta shaqaaqooyinka.

Marka weriyuhu barto amaseba helo tabaha uu ku taxliilin karo amase ku daqiijiyo shaqaaqda ayaa waxay taasi wariyaha u saamaxayso inuu noqdo qof mehened yaaqaanimadiisa ay aad u sareyso oo wax ku ool ah iyo qof si durugsan wax u og.

Taas ayaana qaadanaysa magaca ah Saxaafadda Garwaaqasan Shaqaaqada. Conflict Sensitive Journalism.

## Ereyga shaqaaqo muxuu yahay?.

Shaqaaqo waxay weeye xaalad halka laba shaqsi ama ka badan amaseba kooxo isku dayaya ama u halgamaya inay gaaraan yool ama han ay rumeysan yihiin in aaney wadaagi karin. Ma ahin in shaqaaqooyinka badankood ay wataan falal keeni kara inuu dhiig daato. Waa caado in isdiid uu yimaado marka isbedel dhaco. Kuwo waxay yihiin isbedel doon halka kuwa kalena ay yihiin isbedel diid. Haddii marka isdiidkaas ama shaqaaqada lagu xaliyo qaab nabad ah taasi waxay noqoneysaa mid ku dhacday geedi socod hagaagsan ama haloosin loo aayo.

Haddiise shaqaaqada aan si wacan loo maareynin, waxay noqoneysaa mid gacan ka hadal u gudubta. Shaqaaqo gacan ka hadal wadata marka ay timaado, dadku waxay la baqaan ammaankooda iyo sii jiritaanka naftooda. Marka aan leenahay shaqaaqo waxaan sida badan ula jeednaa shaqaaqada gacan ka hadalka la socdo.

## Maxaa dhaliya shaqaaqada?

Marka laga fiiriyo caalamka guud ahaan, waxaa la saadlin karaa in shaqaaqadu ay ka dhalan karto arrimaha soo socda:

- Wax dheefku ama hantida yar yahay/tahay oo aan loo qaybsan si siman oo macquul ah sida cuntada, hoyga, shaqada amaseba dhulka.
- Ma jiro amaseba waaba yar yahayba xiriir u dhaxeeya labada kooxood.
- Kooxuhu waxa midba midka kale uu ka qabaa feker ama aragti aan sax ahayn
- Aano hore u jirtay oo aan la soo xallin
- Awoodda oo aan si simman loo qaybsan.

Bal qooraanso isha loo maleyn karo in shaqaaqada dalkeenu ay ka soo burqatay. Fiiri waxaa dhaliyay in shaqaaqado noqoto mid gacan ka hadal ah.

## Doorka saxafiyiinta Soomaalida uga aadan xallinta khilaafaadka nooc kasta.

- Qiimeyn xaaladda dalku marayo
- Dowladda la soo dhisay iyo jidkii dhismaheeda loo soo maray.
- Isdiidka hadda jira
- Danaha shacabka iyo Qaranka Soomaaliyeed
- Hanka siyaasiyiinta
- Danaha caalamka iyo wadamada deriska ah ka leeyihiin Soomaaliya
- Ayadoo la isticmaalayo warbaahinta in shaqaaqada la bedeli karo oo meel dhexe laysugu keenayo geesaha is haya.
- Hal abuurka warbaahinta (sii hurinta ama deminta coolaadaha).

## Fahamka shaqaaqada/xadugudubka

Xadgudubka gacankahadalka shaqaaqada ayaa wariyayaasha si sahal ah u tilmaami karaan . Shaqsiyaadka ama kooxaha ay ka dhaxayso shaqaaqada ayaa is dhaawici kara amaseba isdili kara, waxaana dhacaysa inay waxyeello culus ku timaado mujtamaca. Tani waxay wariyayaasha ku noqoneysa dhibaato sidii ay u arki lahaayeen dhacdada isla markaana ay u macneyn lahaayeen.

**Dhaqanka shaqaaqada:** ayaa noqon kara waddo ay koox uga fekerto inay koox kale sidii ay waxyeello ugu sammeyn lahayd muddo sanooyin ah. Waxaa ka mid noqon kara erayo leh, muuqaal iyo caqiido la aaminsan yahay oo koox ay rumeysnaan karto, isla weyni iyo qabqab dhaafay oo soo jiidi kara gacan ka hadal. Taana waxaa ka mid ah:

**Weeraha caadawadda isnacaybka xambaarsan**: Qabaa'illo ama dhaqamo kala duwan oo si cad oo cadaawadi ku jirto hadallo xunxun isu dhaafsanaya. Koox ayaa mid kale ku eedeyneysa dhibaatooyinka iyo mashaakilka jira ee ay la gebi dhacleyneyso. Xadgudubku wuxuu geesi geliyaa in la tirtiro kooxda la eedeeyay.

**Jiirnac.** Nacayb uu dal ama shacab uu ka qabo dal ama shacab kale taasoo abuureysa isfaham la'aan taasoo iyana geesi gelineysa hannaan baritaaraya in shaqaaqo lagu qaado wadan kale.

**Sheeko baraley geesiyaal hore ee dagaal lagu buunbuuninayo:** Mujtamac oo sugaanta iyo Buugaagta taariikhda shacabkooda ay ku yaaliin sugaan isla weyni iyo faanfaan guulo waqti hore oo tegay ayaa ku keeni karta inay ku abuurto geesta kale nacayb iyo shareysi.

**Dagaal qiil looga dhigo diin.** Dulqaad la'aan xad dhaaf ah ee loo qabo caqaa'id kale ayaa keeni kara dagaal.

**Faquuqa iyo jinsi faquuqa:** Shuruucda iyo dhaqamada banneynaya in si aan loo sinneyn wax lagu dhaqo taasoo ku saleysan xagga isirka ama jinsiga.

**Shaqaaqada maamul ku habeysan:** Waa wax dhaawac keeni kara oo lagu dhex abuuray shuruuc iyo dhaqamo haraadi ah oo koox ama mujtamac uu ku dhaqmo. Xaaladani waxyeelado waa la oggol yahay ama danba lagama galo.

**Faquuqa jinsiga:** Ayadoo la oggolaado dhaqamada iyo shuruucda lidka ku ah dumarka oo aaney isla shuruucda ay raggu oggolaaneyn ayaa noqon kara hab loo arki karo inuu yahay wax curin kara shaqaaqo gacanka hadal dhalisa.

**Gumeysi:** Wadan aan ka tashan aayihiisa. Awood shisheeye ayaa si qasab ah waxay kula wareegayaan kontroolkii dhamaan hababka lagu gaari lahaa go'aanada muhiimka ah.

**Ka faa'ideysi xad-dhaaf ah:** Waa ka mid ah adoonsiga

**Musuqmaasaq iyo qaraabokiil:** Go'aanada Dawladda oo ay nufuud ku yeeshaan amaseba ay gooyaan marinka xun sida laaluushka, nintooxsiga, qabiilka ama qoyska.

**Faquuq habeysan:** Shuruuc dadweynaha ku qasbeysa inay meelo ama kooxo kala go'go'an ku kala noolaadaan taasoo ka soo horjeeda rabitaankooda

Shaqaaqooyinka aan soo tilmaanay ayaa loo baahan yahay in la tilmaamo marka warka la soo tibiyo isla markaana taxliil lagu sammeynayo shaqaaqada. Sida badan iyagaas ayaa ah kuwa runta ah ee dhaliya shaqaaqo si toos ah qof u taabata. In shaqaaqada la jooojiyaa oo keli ah ma aha wax kaafi ah. Waa xaqiiq ah inay dhacayso mar kale haddii aan dhag jalaq loo siin shaqaaqada ka soo jeeda xagga dhaqanka iyo midda habeysan labada.

Bal fiiri dalkaaga: Ma jiraan shaqaaqo ku dhisaalan dhaqanka iyo hannaanka maamulka? Warbaahintu ma tebisaa? Dadka ay waxyeeladu ka soo gaartay shaqaaqada warka cod maku leeyihiin?

# QAYBTA 2-AAD

## Saxaafadda iyo shaqaaqooyinka

Dhammaan mujtamacyada adduunka ka jira ayaa leh qaab lagu xalliyo khilaafyada iyadoo aaney dhicin wax gacan ka hadal ah.

Sida badan, qof kastoo maskax fayow leh, sida waayeel hoggaamiye tuulo ah ama Garsoore ama maxkamad caalami ah ayaa deegaanku siiyaa awoodo ay go'aan uga gaaran sida loo xallin lahaa khilaafka jira. Go'ankaas waxaa dhowra qof kasta. Haddii go'anka loo maleeyo inuu yahay mid aan xaq aheyn ma noqon karo mid la aqbalo sidaasna waxaa shaqaaqado isu rogtaa gacan ka hadal.

Dad badan oo mehenedyaqaan ah, sida La-taliyayaal, hoggaamiyaasha beelaha, diblomaasiyiin, dadka waanwaanta ka shaqeeya iyo aqoonyahanno ayaa ka si qoto dheer uga fekeraya inta ay qaadaneyso dhammeystirka shaqaaqada dhiiggu ku daatay. Dadka mehnedyaqaan ahi waxay soo hindiseen oo ay ogaadeen in shaqaaqo kastoo jirta - ha ahaato mid dhex martay qoys, dad deris ah, kooxo wada dega dal ama laba wadan - si loo xaliyo waa inay dhacaan waxyaabo muhiim ah ee jira. Shaqaaqadu keligeed iskama dhamaato.

Middan ugu muhiimsan inay dhacdo si shaqaaqada loo damiyo waa weeye xiriir xagga hadalka ah. Laba geesood oo is-haya si ay ugu dhaqaaqaan xagga xalinta khilaafka waa inay marka hore wada hadlaan. Halkan ayaa ah meesha saxaafad wanaagga ay soo galeyso arrinta ku saabsan deminta ama yareynta..

## Doorarka Saxaafadda ee isla Saxaafaddu aaney dareensaneyn:

Saxafiyiinta mehnedyaqaanka ah iyaga ma aha kuwa jaangooya yareynta khilaafka. Waxay doondoonaan inay xogta u soo bandhigaan si surmoseegto ah oo aan geesna raacsaneyn. Sida badan wartebinta wacan ayaa yareysa shaqaaqada.

Waxaa jira dhowr arrimood oo xallinta khilaafka ku lug leh oo saxaafadda wacani dhankeeda si isla markiiba ah (automatic) lagu gaari kaaro taasoo qayb ka ah saxaafadda hawl maalmeedkeeda:

### 1. Wadiiqooyinka wadahadalka

Xogta warbaahinta lagu fidiyo ayaa ah wadiiqada ugu muhiimsan ee wada hadalka dhex mara dhinacyada dirirtu ka dhaxayso. Mararka qaar ayaa waxaa dhacda in gees ay warbaahinta u isticmaasho inay ku baahiso farriimo lagu cabsi gelinayo geesta kale. Laakinse marar kale ayaa waxaa dhacda in geesaha is-haya oo dirirtu ka dhaxayso ay wada hadlaan iyagoo wadahadalkooda u maraya warbaahinta ama saxafiyiin mucayan ah.

### 2. Waxbarashada:

Gees walba waxay doontaa inay ogaato dhibta ay tan ka soo horjeedo qabto sidii loogu bixi lahaa oo loogu dhaqaaqi lahaa dib-u-heshiisiin. Saxaafadda ayaa ah aaladda soo saarta gees kasta dhibta ay qabto oo iyadu u gaarka ah sida danaha siyaasasadda ay leedahay amaseba dano awoodo badan leh halkaana waxay gees walba ogaaneysaa in iska ilaaliso ama ka fogaato inay dalabto xal sahal ah oo si degdeg ah lagu gaaro.

## 3. Kalsooni dhis

Is aamin la'aan ayaa ugu weyn waxyaabaha uga sii dari kara shaqaaqada. Warbaahinta ayaa yareyn karta tuhumada iyadoo si qoto dheer bannaanka u soo dhigeysa arrimaha kulkulul ee xasaasiga ah si aaneyba u jirin wax la qariyo oo labada dhinca oo is-haya baqo ku keeni kara.Warbahinta qumani waxay xogta u soo bandhigi kartaa qaab muujinaya inay jiri karan fursado xal lagu gaari karo tiiyo warbaahintu ay keeneyso tusaalooyin meelo kale oo shaqaaqada xal looga helay haddana dadaalka soconaya markaas u macneyneysa sidii waanwaan lagu gaari lahaa.

### 4. Sixidda fahamka xun

iyadoo baareysa isla markaana tebineysa labada geesood faham la'aanta ay kala qabaan, warbaahintu waxay dhiiri gelineysaa geesaha dirirtu ka dhaxayso inay bedelaan aragtiyadooda oo ay isu soo dhowaadaan si loo yareeyo shaqaaqada.

## 5. Muuqaal Bani'aadminimo

Si labada dhinac ay isu bartaan waa in warbaahinta lagu muujiyo magacyo iyo wejiyo taana waa tallaabo muhiim u ah waanwaanta iyo wadahdalka. Tan ayaa ah sababta keeneysa in dhexdhexaadiyeyaasha inay meel ama hal qol isugu keenaan. Saxaafadda wacani waxay tallaabadan u qaadeysaa inay meesha keento dadka ay talada ka go'do ee xaqiiq ahaan jira isla markaana waxay tilmaan ka bixineysaa sida ay iyagaas u taabaneyso arrimaha la isku hayo ee jira.

## 6. Muujinta danaha asaasiga ee dhinac walba ay leeyahay

Marka lagu jira xaalado shaqaaqo geesaha is-haya waxay u baahan yihiin inay ogaadaan danaha mid kastaba ay leedahay ee uga soo bixi kara mida kale. War tebinta wacan ay tahay mid suuragelin karta iyadoo su'aalo adag weydiineysa oo baadi goobeysa macnaha runta ah ee hoggaamiyeyaasha ay sheegayaan. Wartebinta wacani waxay kaloo eegeysaa danaha ay leeyihiin dadweynaha iyo mujtamaca sida aad ah u ballaaran.

## 7. Gole lagu nafiso

Marka laga hadlayo xalinta khilaafaadka, waa inay jiraan fagaare qeyb walboo ka mid ah shaqaaqada ay si cad ugu muujin karto dareenkooda, waxay tabanayaan, waxay diidan yihiin amaba ka careysan yihiin inay xaaladdu si naf la caarinimo ah uga sii daraan meesha ay joogtay ee horeba oo aan fiicneyn. Warbaahintu waxay diyaarin ama daalin karta fagaare labada geesood u saamaxaya inay wada hadlaan. Dirir badan ayaa lagu dhex diriri karaa warbaahinta inta lagu dagaali lahaa waddooyinka waxaana shaqaaqada lagu xallin karaa inta aaney gaarin heer gacan ka hadal.

## 8. Muujinta shaqaaqada

Ayadoo qaabka shaqaaqada loo muujinayo siyaabo kala duwan, waxay yareyn kartaa xiisadaha jira iyadoo ay halkaa ka bilaaban karaan wadahadallo iyo waanwaan. Warbaahinta wanaagsan,

titaftirayaasha iyo wariyayaasha waxay mar walba shaqaaqada ka eegaan xaglo kala duwan, amaamudka aragti bedel noqon karta, muuqaal si qoto dheer oo cusub soona jiidan kara dhagaystayaal iyo akhristayaal hal sheeko oo mid ah. Warbaahinta wacani waxay dib ugu yegleeli kartaa geesaha dirirtu ka dhaxayso.

## 9. Meel dhexe isugu imaansho

Marka labada dhinac ay isku dayaan inay xaliyaan khilaafka, waa inay dejiyaan cabsida ay qabaan taageeryaashooda. Tebinta waxay hoggamiyayaasha sheegayaan, warbaahintu waxay u saamixi kartaa inay abuuranto in meel dhex laysugu yimaado taasoo ay dhici karto in warku gaaro xitaa dadka qaxootiga iyo kuwa magangalyada siyaasadda oo meelaha fogfog ku nool.

## 10. Xalhelid/gaarid

Xaaladda shaqaaqada marka lagu jiro, gees walba waxaa looga baahan yahay inay la timaado soo jeedimo cadcad oo ka jawaabaya waxay tabanayaan. Maalin kasta, wartebinta wacani waxaa looga baahan yahay inay geesaha is-haya u jeediso su'aalo sidii xal ama heshiis loo gaari lahaa intii lagu soo celcelin lahaa waxyaabaha ay tabanayaan. Saxaafadda wacani waa geedi socod lagu baadi goobayo xal.

## 11. Dhiirigelinta awoodaha simman

Kooxaha shaqaaqada, ayadoo aan laga fiirineyn dhinaca sinnaan la'aanta, waa in dhinacyadu ay rumeysnaadaan in la siinaayo isjir iyo dareen ka war qab haddiiba ay dhinaca kale kula kulmayaan miiska wadahadalka iyo waanwaanta. Saxaafadda wacani waxay dhiirigelineysa waanwaanta iyo wadahadlka waayo tebintu waa mid dhexdhexaad ah oo isu dheelitiran. Waxay u toog heyneysaa dhamaan dhinacyada. Waxay dhiirigelineysaa awood isu dheeli tiran oo looga jeedo in la dhagaysto cabashooyinka isla markiibana loo raadiyo xal/xaluul.

# FAHAMKA NUFUUDKA WARBAAHINTA

11-kan hawlood ee aan soo sheegnay waa hal qayb oo keli ah marka laga hadlayo xallinta khilaafka u dhexeeya koox ama dad. Arrintan waxay ka mid tahay hawlmaalmeedka saxaafadda ee wartebinta wacan. Laakinse marka aan dareensanhay saanta ay yeelan karaan ama reebi karto waxyaabaha aan qabaneyno ayaan si wacan u soo dhoweyn karnaa sida ay muhiim u tahay doorka aan ku leenahay daminta shaqaaqooyinka.Waa inaan helno xaqiiqada isla markaana aan si taxadar leh u kala doorano erayada aan gudbineyno oo laga ilaaliyo xanaf iyo wax laga tuhmi karo intaba.

Ka wariye ahaan tilmaamahani waxay inaga caawin karaan inaan ogaano hawlaha ka soconaya waanwaanta iyo wadahadalka albaabadu u xiran yihiin. Markaan waxyaabahan ogaano, waxaan tebin karnaa waxaan ka barannay waanwaanta iyadoo fahamkeenu aad u sarreeyo.Waxaa jira meelo badan oo adduunka ka mid ah oo ay shaqaaqooyin ka oogan yihiin.

Meelahaas marka ay ka bilowdaan waanwaan, ka qaybgalayaasha waxay sida badan ka welwelaan in warbaahintu aaney fahamsaneyn geedi socodka sidaasna ay ku abuuri karto fahma darri waxaana dhaawacmeysa kalsoonida.

**Is weydii naftaada:** Labadee ama seddexdee meelood ee 11-ka tilmaamo baa cunsur muhiim ah oo noqon kara warbaahinta dalkaaga oo ay ka dhaqangelin kartaa? Ma jirtaa sida badan

wartebinta inay u tebiso sidii xal lagu gaari lahaa? Saxafiyiintu ma ku riixaan hoggaamiyaayaasha geesaha is-haya tafasiil ku saabsan xal helista. Saxafiyiintu ma soo tebiyaan xaqiiq iyo meesha ay sartu ka quruntay?.

## Sidee loo xalliyaa shaqaaqo?

Waa muhiim in la ogaado inay jiraan wax ka badan hal dariiq oo lagu dhammeeyo shaqaaqo. Ka feker shaqaaqadan riwaayada ah. Laba koox ayaa isku heysata geed Liin ah.

## Saxaafadda Wacan ee adduunka

Dadka shaqaaqada isku haya ee meel wadan deggan si dadkaas ay u noqdaan kuwo si fiican xog-ogaal u ah oo ay weliba suuragal noqon karto inay xaliyaan xurgufta dhextaal, waa inay leeyihiin saxaafadda wacan oo toosan. Caalamka oo dhan, saxafiyiinta meheredyaqaanka ah waxay soo saareen mabaa'dii iyo heerar asaasi ah oo ay ku doonayaan inay gaaraan saxaafad wacan. Nasiib darrase, waxaa jiro goobo badan oo ka mid ah adduunka oo saxafiyiintu ku shaqeeyaan shuruuc kala duwan oo ay dawladdu dusha uga keentay amase kooxo awood badan leh oo dano gaar ah leh. Laakinse, markastoo ay saxafiyiinta mehnedyqaanka ahi si xor ah ay u kulmaan waxay tixgeliyaan oo sammeynayaan si iyagu naftooda ugu daadihiyaan heerarka mehenedyaqaanka.

Waxaa adduunka ka jira in ka badna 50 urur oo mehenedyaqaan ah oo leh anshax dhaqameed. Waxaa laga helaa boggagooda internetka. Tusaale waxaa loo soo qaadan karaa ururka International Federation of Journalists (www.ifj.org)

## Saxaafadda wacan maxaa laga rabaa in aaney sammeyn?

**Aflagaado.**

Saxaafadda wanaagsan been ma sheegto mana qaloociso runta ku saabsan dadka.

**Waxaan asal laheyn oo meel kale laga soo minguuriyay**

Saxaafadda wacani si sahal ah uguma celceliso wax hore meelo kale loog baahiyo

**Karaahiyo/nacayb**

Saxaafaddu waa awood xoog ah. Xogaha la soo tebinayo waxay dhaawici karaan sharafka, waxay dadka gelin karaan khatar ama waxay abuuri karaan argagax. Saxaafadda wanaagsan looguma isticmaalo si ula kac ah in dad kale lagu waxyeeleeyo.

**Musuqmaasuq**

Saxaafadda wacani ma oggolaato laaluush. Ixsaan gaar ahna qolo uma sammeyso. Saxaafadda wacani lama gadan karo.

**Maxaa laga rabaa inay saxaafadda wacani ku jiraan**

## 1. Xaqiiq

Soo helidda xogta dhabta ah ayaa wax walba ka muhiimsan. Wax kasto oo la soo tebinayo waa in si sax loo tilmaamo - higaada magacyada, xaqiiqda siday u dhacday, iyo micnaha

dhabta waxaa la yiri. Intaan xogta la soo tebin, saxaafadda wacani waxay baadigoobtaa maragta iyo xaqiiqda dhabta ah.

Saxafiga wanaagsan wuxuu si degdeg ah ugu cararaa inuu horta soo helo xogta. Laakinse, marka hore saxafigu waa inuu helo sida saxda ahayd. Dadka la hadli mayaan saxafiyiinta haddii ay ka cabsanayaan in aanan wararkooda sidii saxda ee uu ahaa aan loogu soo celineyn.

## 2. Dheelitir aan geesna raacsaneyn

Dhammaan anshaxa saxaafadda wacani wuxuu diiradda saaraa muhiimadda dhexdhexaadnimada oo qabta inaan geesna la raacin. Marka sidan la yeelo, Saxaafadda wacani waxay doontaa inay soo saarto xog dheelitiran. Si xogtu u noqoto mid isu dheelitiran waa inay sheekada ka wada muuqdaan geesaha is-haya ee ku lugta leh shaqaaqada. Dadweynuhu waxay rabaan inay ogaadaan kuwa kale waxay leeyihiin iyo sida waxa la sheegay ay u sameynayaan.

Sida runta oo kale, dheelitirku waa u muhiim sheeko kastoo la soo tebiyo. Dadka lama hadlaan saxafi hal doc uu sheekada ka mid ah warka ka soo tebiya.

Dhexdhexaadnimada waxay kaloo macnaheed tahay in saxafiga mehnedyaqaanka ah in hoggaamiye firfircoon uusan u ahayn koox ama dhaqdhaqaaq siyaasadeed. Saxaafad aan geesna raacsanayn waxay muhiim u tahay saxafiga marka ay jirto shaqaaqo, waayo waqtiyadaas saxafiyiinta waa la xushmeeya madaama aan geesna raacsanayn.

## 3. Masuuliyad

Saxafiyiintu waxaa masuuliyad gaar ah ka saaran tahay dadka ay wararka ka soo tebinyaan iyo mutjamaca ay isla warkaas u soo gudbinayaan. Saxafiyiintu waxaa masuuliyad ka saaran tahay inay ilaaliyaan isha ay wararka ka soo heleen. Dad badan ayaan saxafiyiinta wararka muhiimka siin marba haddii ay ka baqanayaan in iyaga la shaaciyo.

Saxafiga fiican wuxuu kaloo xog helidda u isticmaala hab hufan oo macnaheedu in aan la sharciga la jebin.

## Xaqiiq + dhexdhexaadnimo + Masuuliyad = kalsooni

Inta aan soo sheegnay ayaa ah heerarka ay saxaafaddu soo saarto oo shacabka ay aamini karaan. Dhamaan wartebinta lagu kalsoon yahay waa inay ahaato mid run ah, dhexdhexaad ah iyo masuul intaba. Waxaa lagu dhaqi karaa qeyb kastoo ka mid ah howsha.

Waqti kasta, wariyayaasha toosan waxay naftooda is weydiiyaan: Hawsheyda ma ku fadhidaa saxaafadda la isku halleyn karo oo lagu kalsoonaan karo. Warbixinteyda ma ku jiraan xaqiiq, dhexdhexaadnimo iyo masuuliyad.

## Saxaafadda lagu kalsoon yahay iyo Dimoqaraadiyadda

Wertebinta la isku halleyn karo ayaa ah mid saxaafadda u soo jiida sumcad meel wacan ka gelisa Dastuurada iyo Shuruucada wadamada badan. Ayadoo la adeegsanayo qalabka warbaahinta, dadweynaha waxay fal gelin karaan xaqa ay u leeyihiin xoriyadda fekerka sida ku cad qodobka 19-aad ee Baaqa Caalamka ee Xuquuqda Aadanaha. Halka ay ka jiraan xoriyaadka fekerka iyo saxaafad la isku halleyn karo, shacabka ayaa kari kara inay sammeeyaan go’aan qaadasho siyaasadeed oo xog-ogaal ah ugu fiican oo danahooda ku jirto. Tani waxay muhiim ah u tahay dimoqraadiyadda.

# Isku halleyn, kala nooc iyo madax bannaani

Haddii la rabo dimoqraadiyaddu inay si haboon u tisqaado oo ay bulaasho, warbaahintu ma aha oo keliya inay noqoto mid la isku halleyn karo oo ee waa inay noqotaa mid kala duwan oo kala nooc ah. Warbaahin hal nooc ah ma sammeyn karto wax dadka ku wada filnaada.Waxaa loo baahan yahay warbaahin kala duwan oo u xaqiijineysa aragtiyo tartamaya iyo warbixino kala duwan oo dareenka dadweynaha loo bandhigayo.

Warbaahinta la isku halleyn karo oo kala nooca ah waa inay laasim ahaato mid xor ah. Warbaahintu waa inay xor ka ahaato dawladda ama faragelin awoodo leh oo horjoogsanaya tebinta codadka kala iyo danaha kale. Warbaahin xor ah waa inay gacan ka hesho shuruucada iyo maxkamadaha iyo xeer beegti madax bannaan oo gaashaan warbaahinta uga noqonaya faragelin.

Warbaahin xor ah waa inay tahay mid edeb iyo dishibliin leh una hoggaansanaato isuna dhiibto sharciga iyo xeerbeetida ayna u dheer tahay sariig iyo dhan-u-janjeer la'aan.

Waxaa jira saxafiyiin ku dooda in aaney shaqadooda ahayn inay qaadayaan masuuliyadda waxa dhacaya marka ay soo sammeynayaan hawsha wartebinta wararka. Waxay leeyihiin waxaan shaqaaqada u soo tebineynaa si la mid ah sidaan u soo tebino cayaar kubadda cagta ah oo kale. Waa tilmaameynaa shaqaaqada. Laakinse tan keli ah kuma filna.

# Saxaafadda damqashada leh ee shaqaaqada.

## Maya xaqiiq qaawan

Saxafiyiin badan ayaa maanta aqoonsan in aan ka badanahay mehnedyaqaan iyo sugayaal ama dhowrayaal ama qaybiyayaasha xaqiiqda. Waxaan garwaaqsanahay in dadka kale ay yaqaaniin sida loo abuuro xaqiiqda oo aan anaguna tebino. Waxay leeyihiin stratejiyo warbaahineed. Waxay dadkaasi doortan dhowr xaqiiqo oo ay u sheegaan warbaahinta una isticmaalaan qalabka warbaahinta si ay raad ugu yeesheen aragtida dadku ka qabaan shaqaaqada. Haddaba, Saxafiyiinta wacani waxay ogyihiin in aaney waxaasi ahayn xaqiiq qaawan.

Haddii aan shaqaaqada dhiiggu ku daaday aan ka tebino oo keli ah xaqiiqda qaawan, dadweynaha waxay marti u ahaanayaan oo keli ah waxaas gees keligeed ay sidey doonto u soo dhoobdhoobtay.

Laakinse, haddaan baadi goobno warka ka danbeeya xaqiiqda qaawan una soo bandhigno dadweynaha xog fara badan oo weliba ay ku jiraan wixii xal noqon lahaa, waxay shaqaaqada u arkayaan si ka duwan warka la dhoobdhoobay. Haddii Bam lagu qariyay gaari uu qarxay shalay, ma soo tebineyno oo keli ah dhacdada kumana celcelineyno waxa caadiga oo ay madaxdu ka yiraahdeen shilka. Waa inaan soo tebinnaa oo kale sida shilku u saameeyay nolosha dadka caadiga ah isla markaana aan doono fekerka ay ka qabaan shaqaaqada. Waa inaan soo tebinnaa isku dayo cusub oo lagu dhammeynayo shaqaaqada annagoo isla markaa dadweynaha u diyaarineyna warar xambaarsan xaqiiq cadcad.

Warka aan tebineyno wuxuu noqon karaa mid mujtamaca wax ka duminaya amase wax dhisaya. Warka wax dumiya waa kan xambaarsan dhiillo colaadeed iyo cabsi. Warka wax dhisa waa kan dadweynaha si fiican u wargeliya soona bandhiga dadaal lagu yareynayo shaqaaqada. Tani waa saxaafadda leh ka damqashada shaqaaqada.

Saxafiga damqashada leh wuxuu ku shaqeeya inuu sammeeyo taxliil ku saabsan shaqaaqada isla markaana baarbaaro codad cusub iyo araa' cusub oo ku saabsan dirirta ama shaqaaqada. Wariyuhu wuxuu soo tebinayaa yaa isku dayaya inuu xalliyo khilaafka wuxuuna hoos u eegaya dhamaan dhincyada khilaafka ku lugta leh. Wuxuu kaloo soo tebinayaa sida hadda ka hor loo

xalliyo khilaafyo hore u jiray oo midkan hadda jira noociisa ah. Saxafiga hawshan ku jira ma aha inuu dhan u janjeero laakiinse wuxuu ku mashquulaa baadigoobka sidii xal lagu heli lahaa. Saxafiga hawshan ku jira wuxuu ereyada uu isticmaalayaa u doortaa si taxadir ku jiro.

## Liis taxane ah ee tebinta saxaafadda dareenka damqashada leh

Ka fogow tebinta shaqaaqada/dirir ka dhaxaysa laba gees oo iska soo horjeeda. Doon dano kale ee ay dirirtu saameysay kuna dar sheekadooda, araa'dooda iyo yoolalkooda. Wareysi la yeelo ganacsade ay saameyn ku reebtay shaqo-ka-fadhiisiiga guud ee la sammeeyay, shaqaale aan awoodi kari inay shaqo qabtaan, qaxooti duuleedka caasimadda deggay oo raba in shaqaaqada la dhammeeyo iwm.

Ka fogow inaad tacriif ka bixiso dirirta adigoo marka kasta soo xigeynaya hoggaamiyeyaasha oo sheegsheega codad dadku ay ka wada dheregsan yihiin. Aad oo tag waxa ka dambeeya oo ka shisheeya dadka warka hore loogu yiqiin. Soo tebi erayada dadka caadiga ah oo cod dheer ku muujin kara araa' ay wadaagaan dad badan.

**Ka fogow** oo keliya inaad soo tebiso wax kala sii qaybinaya geesaha shaqaaqada ku lugta leh. Weydii geesaha iska soo horjeeda su'aalo daaha ka qaadaya meel dhexe oo laysugu imaan karo. Soo tebi dano ama yoolal oo laga yaabo inay wadaagi karaan.

**Ka fogow** mar walba inaad liishaanka saarto xanuunka iyo cabsida ay qabto hal dhinac. U bandhig labada geesood xanuunkooda iyo cabsidooda si siman oo macno war leh.

**Ka fogow** isticmaalka erayada sida burbur, hoog, halaag iyo argagax marka aad sheegeyso wax la yeelay koox qur ah. Erayada noocan ah waxay Wariyaha ku ridayaan inuu meel u janjeero. Ka wariye ahaan adiga erayada ha isticmaalin. U saari qof kale oo isaga ka xigo haddiiba uu jiro inuu sidaa yiri.

**Ka fogow** erayo aan dhab aheyn oo laab la kac ah xambaarsan.

Ha yareysan dhibta iyo xanuunka, laakin, si taxadar ku jiro u isticmaal erayo xoogan.

**Ka fogow** eryada sida argagixiso, xagjir iyo maro ku dhag. Erayadani waxay raacayaan gees waxayna geesta kale ka dhigayaan gees aaney suurtagal aheyn in waanwaan lala geli karo. Ugu yeer dadka waxay iyaga laftooda isugu yeeraan.

**Ka fogow** inaad feker ka yeesho xaqiiq. Hadduu qof wax sheegto, qor magaciisa, taasina waxay noqoneysa fekerkooda mana aha xaqiiqadada.

**Ka fogow** inaad ka dhowrto hoggaamiyayaasha hal dhinca inay iyagu keeni karaan xal. Baadigoob hal abuur nabadeed meel kastoo ay ka yimaadiin. Hal abuurkana u jeedi hoggamiyeyaasha geesta kale soona tebi jawaabahooda.

Ka wariye ahaan, qalabka ugu xoogga badan ee aan isticmaalno waxaa ugu awood badan erayada aan isticmaalno. Sidoo kalena waxaa ah shanqarta iyo sawirka. Waxaan qalabkeena u isticmaali karnaa inaan dhisno isfaham halka aan ka abuuri lahayn cabsi iyo sheeko baraley.

## Tusaalooyin saxaafadda dareensan shaqaaqada

**Wartebinta caadiga ah**

*Muqdisho, SONNA. Wadahadal la doonayay in lagu dhammeeyo shaqaaqada ka oogan Soomaaliya ayaa habeenkii xalay ahaa burburay kaddib markii dabley aan heybtooda la garanayn ay xasuuqeen 8 nin oo Boolis ah ayadoo welibana jirkooda la googooyay.*

*Silicaasi wuxuu ka dhacay Buulo Mugdi, halkaasoo Boolis ilaalo ahaa lagu weeraray hubka darantooriga u dhaca iyo Garneylo. Sidaasna waxaa sheegay afhayeen. Lix kalena waa la dhaawacay iyadoo halkaas lagu burburiyay seddex gaari.*

*Afhayeenku Cali Axmed wuxuu sheegay in meydka ragga lagu googoyay Toorey iyadoo nin ka mid ah uu madaxa ka burbursana.*

Waxaa la rumeysan yahay in weerarkaasi ay geysteen wax afhayeenku ku sheegay argagixisada ka timid meel ka mid ah dhulka Buuraleyda ee Buulada. Afhayeenka ayaa sheegay in raggiisu ay jawaab celin awoodi kareen inay ka bixiyaan weerarkaas iyagoo ula jeeda inay isdifaacayaan.

**Wartebinta dareensan shaqaaqada**

*Muqdisho, SONNA -- Waxaa soo baxaya cambaareyn ka immaanaysa dhamaan geesaha siyaasadda ee dalka Soomalia kaddib markii ciidan Boolis ee ilaalo ahaa dhibaato ka soo gaartay inay waayaan 8 rag ah.*

*Dhaamaan axsaabta waaweyn ee ka wakiil ah aqaliyaadka laga tirada badan yahay ayaa iska fogeeyay dilkaas oo la rumeysan yahay inay ku kaceen kuwa iskood iskugu magacawday ciidanka xoreynta Qaranka.*

*Cali Axmed oo ah hoggaamiyaha siyaasadda CXQ ayaa beeniyay in raggaasu aaney weerarin ciidanka Booliska isagoo sheegay in ciidankiisu ay dhici lahayd inay iska caabin sammeeyaan.*

*Lakiin Dawladda ayaa sheegtay in aaney ku dhaqaaqin Booliska ficil dhalin kara in weerar kaas oo kale la soo qaado oo hubkii laysu adeegsaday ay ku burbureen seddex gaari.*

*Afhayeenku wuxuu inta ku daray in meydka u muuqday in lagu jaray middi ayadoo nin madaxii uu ka muuqday dhaawac meel godan.*

## Bal eeg faraqa?

**Qaabka wartebinta caadiga ah**

Warku gebi ahaanba wuxuu xun yahay wuxuuna xambaarsan yahay dhiillo mana doonayo geesta kale aragtidooda. Wuxuu caddeynaya xumaha tan ugu sii xun taasoo ah wadahadlkii waa burburay.

Wuxuu isticmaalaya erayo kicin ah amaba aanba loo baahneyn sida xasuuq, jir doorsoomay, silcin. Wuxuu ku nuuxnuusanaya shaqaaqada ayadoo la isticmaalayo erayo sida jir la googooyay.

Habka wertebinta caadiga ah waxay u xaglineysa hal dhinac. Warku wuxuu tilmaameya dhinaca afhayeenka ciidanka boliiska oo keli ah kaasoo leh ciidanka ilaalada ah waa la weeraray.

## Habka wartebinta dareensan shaqaaqada.

Warbixinta waxay sii tibaaxaysa wax ka sii badan shaqaaqada waxayna soo warineysa dadka cambaareyay shaqaaqada

Warku waa dheeli tiran yahay si degdeg ah. CXQ ayaa beeniyay inay iyagu weerareen ilaalada, laakinse waxay qireen inuu dagaal dhacay.

Dhanka kale waxaa la sheegay magaca ay iyadu isku magacawdo: Ciidanka Xoreynta Qaranka

Shaqaaqadu ma qarsoona mana la mooga. Laakinse waxaa loo soo tebiyay si la sheegtay ee ma ahin si xaqiiq ah.

**DHAMMAAD**

HAY'ADDA WARBAAHINTA BARIGA AFRIKA FARACA SOOMAALIYA

EASTERN AFRICA MEDIA INSTITUTE SOMALIA CHAPTER

EMAIL: info@eamis.org / www.eamis.org

Muuse Maxamuud Jiisow
somali39@hotmail.com
Muqdisho Somaliya
025215576666
002521653623

Faafin: SomaliTalk.com | Aug 3, 2007

Sawirada Hoos ka fiiri:
















USAID
Workshop on Conflict Sensitive Journalism
SEMINAARKA SAXAAFADDA DAREENSAN SHAQAAQOOYINKA
South-Central Somalia Mogadishu, 30th July — 3rd August, 2007
Funded By: CARE/USAID
CSMT Media Empowerment Project























----------------------------------
**FAAFIN: [www.SomaliTalk.com](http://www.SomaliTalk.com) | Aug 3, 2007**